



## WAXA AAN DOONAYAA INAAN KA QEYB QAATO QOF WEYN AHAAN!

Qofka qoyska ka mid ah ama qofka weyn ayaa sidoo kale si diiran loogu soo dhaweynayaa inuu ka qeyb qaato! Waxaad adigu imaan kartaa hogaamiye ahaan, sameyso inaad wada ciyaartaan, ka caawiso cuntada, masuul ka noqoto lookaalada ama inaad caruurta qaado. Waxa laga yaabaa inay jiraan wax aad adigu xiiseyso?
Doorka hogaamiyayaasha Scout-ku waxa weeye in la taageero oo la dhageysto oo la caawiyo marka loo baahdo. Marka ay da'da scout-dadu ka sii weynaato ayaa loo baahan yahay hogaamiyeyaal ka sii badan oo iyagu ka masuul ah. Hogaamiyayaasha scouter-ka waxay yihiin da' kasta iyadoo aanay marna habsan aheyn in laga qeyb qaato. Waxa xataa jira kaalmo taageero oo sida barnaamij simisterka, buugaag, waxbarasho iyo bangi waxqabad.
Anaga kuwayaga ka qeyb qaata scout-ka ayaa tabaruc ahaan ku shaqeeya, sidaad darteed ayay ka sii wanaagsan tahay haddii dadku ay bataan. Nala soo xidhiidh haddii aad doonayso inaad tijaabiso ka qeyb qaadashada.

**WWW.SCOUTERNA.SE**

Scouterna



# HEL XILI WAXQABAD OO KA XIISO BADAN!

Om Scouterna på somaliska

# XIISOLEH, WADAJIR IYO HORUMAR

Scout-ka waxaad ka helaysaa waxqabad iyo asxaab cusub, iyadoo aan da'da iyo meesha aad degab tahay toona loo eegeyn. Halkan ayaad ka dareemi kartaa tacabir dabeecada, inaad hesho hab cusub oo aad u xaliso dhibaatooyinka ama inaad kaliya hesho madadaalo wadajir ah marka aynu sahamineyno dunida. Iyadoo aad dabcan ka qeyb qaadan doonto go'aaminta waxa aynu daawaneyno!

Scout-ku waxay siiyaan carruurta iyo da'yarta ka socota dhamaan qeyb kasta oo bulshada ka mid ah inay wadajir u helaan tacabir oo ay qof ahaan koraan. Waxaanu nahay urur aan siyaasad iyo diin toona ku xidhneyn. Dhamaan kooxaha scout-ka waxay wadaaan scout-sameyn iyadoo waxabadku uu kala duduwanaan karro taas oo ku xidhan waxa la xiiseynaayo iyo awooda waxqabad. Qaarkood ayaa awooda saara doon kaxaysiga ama in dibada loo baxo, kuwakale ayaa waxqabadka bulshada awooda saara, muusiga, inaan khamri la cabin ama waxa la aaminsan yahay.

Qiimeyntayada waxay ka muuqataa waxkasta oo aanu sameyno - waxaanu nahay asxaab wanaagsan oo ilaaliya qofkasta qiimahiisa! Scout-ka waxqabadkooda waxa uu ka muuqdaa ururada degaanka, kooxaha scout-ka, iyadoo ay jiraan kooxo wadanka oo dhan ku yaala. Kooxaha waxaynu u kala qeyb qeybsanahey da' ahaan iyadoo aynu kulano ugu yaraan hal mar todobaadkii xiliga jilaalka iyo guga. Marka aynu kulano ayaynu sameynaa wax kasta laga bilaabo inaynu barano is badbaadinta degaanka ilaa in laga wada doodo su'aalaha sinaanta ama la sameeyo waxqabad bulshada. Si aad uga qeyb qaadato Scout-ka waa inay xubin ka ayaato mid ka mid ah kooxaha Scout-ka. Kooxdaada degaanka ayaa ka helaysaa macluumaadka qiimaha xubinnimada. Hadii aad qabto su'aalo ku sabsan xubinnimada ama haddii uu ilmahaagu leeyahay baahi gaar ah, la hadal gudoomiyaha ama hogaamiyaha kooxda.





## XERADA IYO TACABIRKA

Scout-ka waxaanu inta badan sameynaa safarka maalinta ama tacabir gaaban oo habeenkii la dhaxo. Scout-ka ka mid ahaan waxaad dareemi tacabir, inaad tijaabiso waxyaalo cusub, is qiyaastid adigu oo aad hesho wax aad waligaa xasuusatid. Xiliga xagaaga ayaa kooxaha Scout-ku intooda badan sameeyaan xerooyin. Xeradu waxay caadi ahaan ka dheertey safarka maalinta, waxa la dhixi karaa habeeno badan. Marka la joogo xerada ayaa la qaban karaa waxyaalo badan oo waxqabadyada Scout-ka ah iyadoo aad la kulmeyso asxaab badan oo cusub. Marmarka qaarkood ayay Scout-ku sameeyaan waxqabad banaanka, markaas ayay muhiim tahay in dhamaan la qalalan yahay oo la diiran yahay. Kuwa aan haysan dharka roobka ama kabaha kulul ayaa hogaamiye caawimo weydiisan kara.